



WA Cares Fund Xuquuqaha iyo Mas'uuliyadaha

WA Cares Fund
Rights and Responsibilities



Magaca Ka-faa'iideystaha

Lambarka Aqoonsiga WA Cares

| Xuquuqahaaga | Mas'uuliyadahaaga |
|--|--|
| <p>Xaq-u-yeelashada dheefaha waxaa ay ka dhigan tahay in lagu oggolaaday mid kasta oo ka mid ah adeegyada iyo taageerooyinka WA Cares Fund uu bixiyiyo, waxaadna dooran kartaa kuwa aad doonayso in aad isticmaasho.</p> <p>Waxaad xaq u leedahay:</p> <ul style="list-style-type: none"> • In lagu la dhaqmo si sharaf leh, ixtiraam leh, oo aan takoor lahayn. • In aad doorato adeegyada la oggolaaday ee haqabtira baahiyadaada, marka aad xaq u yeelato. • In aad doorato ama iska beddesho shirkadaha ama dadka bixiya adeegyada iyo taageerooyinka muddada-dheer. • In aad hesho ogeysiiska go'aaminta xaq-u-yeelashada. • In aad hesho agab qoraal ah oo habka aad doorbidayso ah. • In aad hesho agab qoraal ah oo ku qoran luuqadda aad doorbidayso. • In aad hesho adeegyo tarjumaan oo si bilaash ah loo bixiyiyo. • In aad cabasho soo gudbiso adiga oo aan ka baqayn in dhibaato lagu gaysto. • In aan u qoondeyso ama ka saarto isticmaalaha la oggolaaday akoonkaaga. • In aad diido ka jawaabista su'aalo ama ka qaybgalka hannaanka go'aaminta xaq u yeelashada. Tani ayaa saameyn ku yeellan karta natiijooyinka xaq u yeelashada iyo dheefo helidda. • Go'aamada rafcaanka ay waaxdu qaadatay. | <p>Waxaad mas'uul ka tahay:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Doorashada hal ama in ka badan oo ah bixiyaha(-yaasha) taageerooyinka iyo adeegyada muddada-dheer si aad u bixiso adeegyada la oggolaaday ee la rabo. • Kala gorgortanka adeeg-bixinta iyo qiimayaasha hal ama in ka badan oo ah bixiyaha(-yaasha) taageerooyinka iyo adeegyada muddada-dheer ee ku dhaca gudaha baaramitirada adeegyada la ansixiyay. • Ansixinta ama diidista oggolaanshaha hore ee ka horreeya adeeg bixinta ee bixiyaha taageerooyinka iyo adeegyada muddada-dheer. • Ku wargelinta waaxda wakiilka sharciga ah ee adiga ku meteli doonna. • Ogeysiinta waaxda isbeddellada degaanka, macluumaadka xiriirka, ama magaca ee 30 maalmood oo kaaladarka ah gudahooda ka-dib isbeddelka. • Ku magacaabista isticmaalayaasha idman akoonkaaga, haddii la rabo. • Qeexidda mas'uuliyadaha isticmaale kasta ee idman. • Suuragelinta deegaan ammaan ah oo loogu talagalay bixiyayaasha taageerooyinka iyo adeegyada muddada-dheer ee adeegyada bixinaya; iyo haddii la helo, ka dhigista natiijooyinka baaritaanka raadraaca kuwo gaar ah iyada oo la raacayo cutubka 43.43 RCW. • U gudbinta dokumentiyada loo baahan yahay WA Cares ama bixiyayaasha marka la codsado. |
| Adeegyada Diiwaangelinta Cod-bixiyaha | |
| <p>Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyaha Qaranka ee 1993 wuxuu u baahan yahay in dhammaan gobollada ay bixiyaan caawimaadda diiwaangelinta cod-bixiyaha iyadoo loo marayo xafiisyadooda caawimaadda dadweynaha. Codsashada diiwaangelinta ama diidista in la isku diiwaangeliyo codbixinta ma saameyn doonto adeegyada ama dheefaha aad heli doonto. Haddii aad jeclaan lahayd in lagaa caawiyo buuxinta foomka diiwaangelinta cod-bixiyaha, waan kaa caawin doonnaa. Go'aankaaga isu-diiwaangelinta ama diidista isu-diiwaangelinta codeynta waxa uu noqon doonnaa mid sir ah oo kaliya loo adeegsado diiwaangelinta cod-bixiyaha.</p> <p>Haddii aad aaminsan tahay in qof uu soo farogeliyay xaq aad u leedahay in aad isdiiwaangeliso ama diido in aad isdiiwaangeliso si aad u codeyso, xaq aad u leedahay asturnaanta ee go'aansashada haddii aad isdiiwaangelinayso ama codsaneyso in aad isu-diiwaangeliso codeynta, ama xaq aad u leedahay in aad doorato xisbigaaga siyaasadeed ama dookhaaga siyaasadeed, waxaad cabasho u soo gudbin kartaa:</p> <p>Washington State Elections Office PO Box 40229 Olympia, WA 98504 – 0229 1 (800) 448-4881</p> | |

Caawimaad

La xiriir WA Cares si aad caawimaad u hesho: 1-884-CARE4WA (844-227-3492).

Saxiixa Ka-faa'iideystaha ama Wakiilka Sharciga ah

Marka aad saxiixdo, waxaad qiraysaa in aad heshay xuquuqahaaga iyo mas'uuliyadahaaga.

| | | |
|---|----------|-----------------|
| Saxiixa Ka-faa'iideystaha | Taariikh | Magaca Daabacan |
| Saxiixa Wakiilka Sharciga ah (haddii ay habboon tahay) | Taariikh | Magaca Daabacan |
| Saxiixa Markhaatiga (haddii lagu saxiixay "X") | Taariikh | Magaca Daabacan |

Ogeysiiska macaamiisha iyo shaqaalaha (Madaxa VI iyo VII): Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington waa loo-shaqeeye bixiya fursad loo siman yahay oo cidna kuma takoorto goob shaqo kasta, barnaamijyadeeda ama adeegyadeedda iyadoo ku saleynaysa da'da qofka, lab ama dhedig, dookha galmo, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, xaaladda guurka, isirka, caqiidada, midabka, qofka asal ahaan dalka uu ka soo-jeedo, diinta ama aaminsanaanta, xiriirka siyaasadeed, xaaladda militeri, askari hore oo si sharaf leh ciidanka uga baxay, Xilligii Fiitnaam, dhowaan ka tagay ama xaaladda askar hore oo la ilaaliyo ee kale, jiritaanka wax dhibaato dareen, dhimir, naafonimo jireed ah ama isticmaalka eey hage ahaan loo tababaray ama xayawaannada u adeegga qofka naafada ah, mushaarka loo siman yahay ama macluumaadka hiddo-sidaha.